Xaqa waxbarashada iyo waxbarashada qasabka ah

Warbxin ku socota waalidiinta ay ilmaha u dhigtaan xannaanada, dugsiga hoose dhexe iyo dugsiga hoose dhexe ee ardayda baahiyaha gaarka qaba.

ÖREBRO

Ka waalid ahaan aad ayaad muhiim ugu tahay waxbarashada ilmahaaga

Wadajirkeenu waa wanaaga ilmaha

Ka waalid ahaan inaa aad u xiiseyso oo ay kaa go'antahay waxbarashada ilmahaaga waa arrin muhiim u ah guusha waxbarashada ilmahaaga. Haddii ilmaha uusan rabin inuu aado dugsiga waxaa muhiim ah dadkeena waaweyn inaa u dhego nuglaano oo aan ogaano sababta ka dambeysa si uu u helo taageero sax ah.

Wadashaqeyn wanaagsan iyo wadahadal joogto ah oo lala yeesho dugsiga waxay abuurtaa shuruudo wanaagsan oo ilmahaaga ku dareemo wanaag iyo horumar.

Adiga ka waalid ahaan ayaa mas'uul ka ah in ilmahaaga uu tago dugsiga. Haddii ilmaha uu xanuunsanyahay waa inaa isla markiiba soo wargelisaa dugsiga. Haddii ilmaha uusan dugsiga aadeynin waa inay jirtaa sabab muhiim ah sida tusaale ahaan xannuun ama fasax uu dugsiga oggolaaday.

Degmada Örebro waxay isticmaashaa skola 24, oo ah nidaam shabakada ku saleysan oo jadwalka lagu qoro isla markaana lagu diiwaan geliyo maqnaanshaha.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo diiwaangeliyo waxaad ka heli kartaa bogga maqnaanshaha iyo waxbarashada qasabka ah ee dugsiga hoose dhexe ee orebro.se.

Waxbarashada qasabka-mas'uuliyad wadaag ah

Waxbarashada qasabka ah macnaheedu waa in ilmaha oo dhan ay qasab ku tahay inay dugsi aadaan. Tani waxay khuseysaa dhamaan ilmaha ka diiwaan gashan Iswiidhan wuxuuna dhaqangelaayaa deyrta ay ilmaha buuxiyaan 6 sano wuxuuna ku nidaamsan yahay sharciga dugsiyada (SFS 2010:800). Waxaa jira caruur magangelyo doon ah ama sharci darro ku jooga oo aan sharciga waxbarashada qasabka aan qabaneynin balse waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan.

Marka dugsigu qiimeeyo inuu jiro walaac ku saabsan ilmaha, waxaa dugsiga waajib ku ah inuu warbixin walaaca ku saabsan u gudbiyo xafiiska adeega bulshada. Haddii waalidka loo arko inuu gudan waayay waajibkiisa , degmada waxay waalidka ku soo rogi kartaa ganaax.

Xaqa waxbarashada

Iswiidhan ilmaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin waxbarasho lacag la'aan ah. Dugsiga waa inuu ilmaha oo dhan siiyaan jawi amaan ah oo diyaarsan. Taas macnaheedu waa in ilmo walba xaq u leeyahay inuu helo taageero ku haboon baahiyahooda. Badbaado, degganaan wax lagu barto ka qeybgelida iyo saamey ku yeelashada waxay muhiim u tahay sida imaha ay uga helaayaan waxbarashada kuna gaari lahaayeen hadafkooda.

Dib u dhigida waxbarashada qasabka ah

Haddii aj jiraan sababo gaar ah waxbarashada qasabka ah dib ayaa loo dhigi karaa waxaana la bilaabayaa sanadka uu ilmaha buuxinaayo todoba sano.

Dib u dhigida waxbarashada qasabka ah waxaa go'aaminaaya degmada aad deggantahay ka dib marka uu waalidka ilmaha soo dalbado.

Dhameystirka waxbarashada qasabka ah iyo joojinta waxbarashada asabka ah

Haday jirto xaalad aan caadi ahayn ilmaha waxaa loo oggolyahay in waxbarashada qasabka u guto si ka duwan sida ku qoran sharciga waxbarashada. Laakiin waxaa ku xiran shuruudo adag si loo oggolaado in waxbarashada qasabka si kale loo guto, go'aamintana waxaa degmada aad deggantahay u isticmaaleysaa si xaddidan.

Muhiimadda joogitaanka

Waxbarashada oo laga soo dhalaalo waxay abuurtaa fursado uu ilmaha ku helaayo waxqabad iyo rajo mustaqbal oo wanaagsan. Dugsiga ilmahaaga wuxuu ka dhisaa cilaaqaadka, wuxuu ku baranaayaa wada jirka iyo wada shaqeynta dadka kale wuxuuna sameysanaayaa xiriir bulsho oo muhiim ah. Dugsiga wuxuu sidoo kale gudbinaayaa xuquuqul insaanka iyo qiyamka aasaasiga ah ee dimuqraadiyadda. Ilmaha aan dugsiga joogin waxay halis ugu jiraan inay awoodi waayaan inay buuxiyaan hadafka waxbarashada.

Dugsiga waxa uu muhiim u yahay ilmaheena, wuxuu ka difaacayaa xannuunka dhimirka, inuu dembi gal, shaqo la'aan iyo dhibaatooyinka bulshada.

Ka waalid ahaan aad ayaad muhiim ugu tahay kor u qaadida joogitaanka ilmahaaga ee dugsiga

Fadlan waxaad ku caawintaa:

- Si wanaagsan ugala hadal dugsiga, dhhiri geli, xiise geli, dhegeyso oo taagero sii.
- Ka qeyb qaado wadahadalka horumarka ilmahaiyo shirarka waalidiinta.
- La hadal dugsiga una sheeg haddii ay jiraan waxyaabo uu dugsiga u baahan yahay inuu ka ogaado ilmahaaga.
- Goor hore ku wargeli dugsiga haddii aad ogaato in ilmahaaga uu ka soo horjeedo inuu dugsiga aado.
- Kala hadal dugsiga haddii maqnaanshaha ay sabab u tahay wax dugsiga ka jira, sida ugu dhaqsiyaha badan ee uu dugsigu ku ogaado ayaa.

  Dugsiga si wanaagsan wax uga qaban karaa in ilmaha si sax ah ula qabsado dugsiga.
- Samee nidaam fiican oo la xiriira hurdada, cuntada, nadaafada, dharka, dhaqdhaqaaqyada xilli firaaqada iyo waqtiyada shaashada.
- Si feejigan ula soco in caruur iyo dhalinyaro badan ay ku wada xiriiraan baraha bulshada ee kala duwan. Waa muhiim in ilmahaaga aad kala hadasho arrintaan iyo inuu jiro waqti iyo tamar la geliyo dugsiga n.

Calaamadaha hore ee bilawga u ah ka maqnaanshaha dugsiga

Haddii aad ilmahaaga ka dareento calaamadaha hore ee digniinta waa inaa la xiriirtaa dugsiga, waxayna noqon karaan tusaale ahaan:

- Ilmahaaga waxaa ku adag inuu dugsiga dib ugu laabto kadib fasaxa xannuunka ama fasaxa dugsiga.
- Dareen xun oo ku saabsan dugsiga.
- Cabashooyin jireed oo soo noqnoqda, tusaale ahaan calool xannuun ama madax xannuun, kuwaas oo aan lahayn sharaxaad iyo iyadoo hoos u dhacda marka ilmaha loo oggolaado inuu guriga joogo.
- Dhibaatooyin guriga ah subaxdii.
- Waxaa meesha ka maqan xiriir wanaagsan oo ka dhexeeya macallinka iyo ilmahaaga.
- Caqabadaha la xiriira waxbarashada.
- Maqnaansho aan sax ahayn.
- Marka ilmahaaga uu dhigan waayo maadooyinka qaar ama dugsiga imaan waayo tusaale ahaan marka imtixaan jiro, ama ka qeybqaadan waayo maadooyinka cayaaraha ama dibadda loo baxaayo.
- Dhibaatooyinka kala tagga, ilmahaaga wuxuu rbaa inuu mar walba kula soo xiriiro inta lagu jiro xilliga dugsiga la joogo.
- Dhibaatooyin la xiriira isdhexgalka bulshada, ilmahaaga wuu ka baxaa oo ka fogaadaa dhaqdhaqaaqyada bulshada haday noqon lahay guriga iyo dugsigaba.

Kor u qaad joogitaanka oo ka hortag maqnaanshaha

Degmada Örebro ayaa mas'uul ka ah kor u qaadida imaanshaha iyo ka hortagga maqnaanshaha. Qeyb muhiim ah oo ka mid ah hawlaha guusha waa in dugsiga si degdeg ah ula socdo maqnaanshaha ilmaha.

Dugsiga waa inuu ku wargeliyaa ilmaha iyo waalidiinta nidaamka la raacaayo ee ku saabsan imaanshaha, maqnaanshaha iyo fasaxa.

Qorshe hawleedka

Dugsiga waxa uu leeyahay qorshe hawleed kaas oo muujinaaya sida dugsiga u shaqeeyo si kor loogu qaado imaanshaha isla markaana looga hortago oo loo hagaajiyo maqnaanshaha. Qorshe hawleedka wuxuu muujinaayaa waxqabadka, cidda ka mas'uulka ah iyo marka waxqabadka la fulinaayo. Taas macnaheedu waa in adiga waalidka ah lagaa filaayo in skola24 ku soo qortid haddii ilmaha uusan imaaneyn. Haddii ilmaha si sharci darro ah ku maqanyahay isla maalinkii ayaa dugsiga kula soo xiriiraayaa.

Iyadoo la feejignaado oo dhaqsi loo ogaado sababta keenta maqnaashaha ayaa waxay kordhineysaa suuyrtogalnimada in ilmahaaga helo taageero sax ah ee uu u baahanyahay. Iyadoo ku xiran sababta iyo inta ay la'egtahay maqnaanshaha ilmaha, dugsiga waxa uu la xiriiri doonaa adiga waalidka ah iyo ilmahaba.

Dhibaatooyinka ka maqnaanshaha dugsiga

Maqnaanshaha mar walbo waa calaamad shey. Marka dhaqsi loo ogaado sababaha waxay kordhineysaa suurtogalnimada in ilmaahaga uu helo taageero.

Ilmaha qaar waxay halis ugu jiraan inay ku dhacaan dhibaatooyinka ka maqnaashaha dugsigat. Waxay noqonkartaa caawinaad in laga fekero waxyaabaha qatarta ah ee khuseeya ilmahaaga iyo in wax laga beddeli karo si loo yareeyo qatartaas

Fadlan la xiriir dugsiga haddii adiga waalidka ah ama ilmahaaga aad qabtaan fikrado ama walaac ku saabsan dugsiga. Adiga iyo ilmahaagaba waxaad kku fadhidaan qiimo weyn muhiimna waa tihiin!

Faahfaahinta xiriirka dugsiga ilmahaaga dhigto waxaad ka heleysaa bogga dugsiyada ee orebro.se/skola.

Örebro kommun
Förskole- och grundskoleförvaltningen

019-21 10 00
orebro.se/skola

2024

FOTO: ASTRAKAN IMAGES AB, LEIF JOHANSSON/SCANDINAV
PRODUKTION:ÖREBRO KOMMUN